# Tilmaanta ku socota Xarumaha jamacada eer walindka

Kani waa bogga hore ee xarumaha jamacada walid-kaaga. Isticmaal qeybaha bidix si aad u dhex gasho. Kudhufo aaykonka**Liiska Isticmaalaha**si aad u badasho naqshada.




Haddii aadan ku arkin liiskan dhanka bidix, guji saddexda sadar ee ku yaal geeska bidix ee sare

1. **Xarunta Fariimaha**waxey muujisaa ogeysiisyada dagmada iyo dugsiga. Waad eegi kartaa farriimaha barayaashu kuu soo direen qeybta hoose ee inbox-ka.
2. **Maanta** waxey tustaa leylisyo walba oo maanta ama bari ugu ardaga la xushay.
3. **Kalandar** waxa uu muujiyaa leylisyada iyo xaadirida dhacdooyinka (sida maqanayaasha mise daahida) ee ardaga la xushay. Leylisyada iyo dhacdooyinka xaadiritaanka ayaa la gujin karaa si ay shaaca uga qaadaan macluumaad dheeraad oo aad arki karto dhacdooyinkii tagay iyo kuwa mustaqbalka adigoo ku aadinaya taariikhda.
4. **Leylisyo** waxey muujiyaan dhammaan leylisyada la dhammeystiray ee adaga la xushay, oo wata dhibcihiisa, calamadiisa, iyo warbixinta baraha, oo la isugu aadiyay taariikh ahaan. Waxaad sidoo kale isku shaandheyn kartaa leylisyada maqan.
5. **Darajooyin** waxey tusaan ardaga GPA-giisa, wax alla wixii darajo la soo dhajiyay (sida fasaxa dhexe ee sannad dugsiyeedyada) iyo darajooyinka socda ee hadda ee dhammaan fasalada. Guji darajada si aad u aragto qeybaha darajooyinka oo tafaftiran, oo guji qeyb si aad u aragto leylisyada la xiriira iyo dhibcohooda (haddii la heli karo).
6. **Buuga Cusbooneysiita Darajada** wuxuu taxaa dhammaan leylisyada la helay ama haddii kale la cusboonaysiiyay 14-kii maalmood ee la soo dhaafay.
7. **Xaadiritaanka** wuxuu taxaa dhammaan dhacdooyinka xaadiritaanka (maqnaanshaha iyo daahitaanka) ee ardada la xushay ee sannad dugsiyeedka la doortay. Waxaad eegi kartaa macluumaadka taariikhiga ah adiga oo rogaya sannad dugsiyaadba kiisa kale.
8. **Jadwal** waxay tustaa jadwalka ardaga ee sannad dugsiyeed walba, oo ay ku jiraan wareegyada maalin kasta. Jadwalka waxaa la tusaa sanadka oo dhan, dhammaan sannad dugsiyeedyada, iyo dhammaan diiwaangelinta ardaga.
9. **Qorshada Akadeemiyada** wuxuu tusaa horumarka ardaga hadda u socdo ee ku wajahan dhibcaha ugu yar ee loo baahan yahay ee qalinjabinta *(ardada dugsiga sare oo keliya).*
10. **Khidmad** wuxuu muujiyaa kharashyada hadda lagu leeyahay arday kasta waxayna kuu ogolaanaysaa inaad ku bixiso khidmadaha kaarka amaahda, kaarka deynta, ama jeeg elektaroonig ah.
11. **Dukumeentiyo** waxay u ogolaataa waalidiinta inay arkaan oo daabacdaan kaararka warbixinta ardaga.
12. **Wax badan** qeybta tusta dhammaan shabakado kale oo badan oo laheli karo *(Eeg bogga 2-aad faahfaahin dheeraad ah)*

## Arday badan

Marka aad doorato qeyb mise qalab gudaha Campus Parent, waxey ahaan doontaa sideedii hore sii qof loo tuso macluumaadka ardaga. Magaca iyo sawirka ardaga ayaa ka muuqda dhanka midig ee sare. Si aad u badasho inaad aragto macluumaadka arday kale, si fudud u guji sawirka/magaca oo ka dooro liiska hoos u dhacaha.

Marka aad doorato arday, Campus Parent waxa uu ku tusin doonaa macluumaadka ardayga ilaa aad ka doorato mid kale.



## More

| | |
|---|---|
| Address Information | Fiiri ciwaanka iyo lambarka taleefanka qoyska |
| Assessments | fiiri dhibcaha ardaga ee imtixaanada gobolka, qaranka, iyo dagmada. |
| Demographics | Macluumaadka ardaga iyo xiriirka aan qoyska ahayn (xiriirada dagdagga ah) |
| Family Information | Macluumaadka xiriirka iyo xogta xididka ee dhammaan xubnaha qoyska |
| Important Dates | Fasaxyada Dagmada |
| Transportation | Bas iyo/mise macluumaadka ruqsada baarkinka. |
| Parent Access | Furaha lagu heli Koorsooyinka Schoology ee ardayga iyo FirstView |
| Online Verification and Residency | Diiwaangeli arday cusub ama buuxi foomka caddaynta iyo daganaanshaha sannadlaha ah (marka la heli karo) |

## Sidee u...

**Fiir darajada adrageyga?**

*Haddii aad leedahay arday badan, waa inaad ka doorataa arday dhinaca midigta ee sare si aad u aragto macluumaadkooda.*

Guji qeybta **Darajooyin** Waxaad arki doontaa dhibcaha iyo darajooyin socda ee la dhejiyay ee fasal walba, oo waxaad gujin kartaa fasalka si aad u aragto dhibcooyin iyo macluumaad faahfaahsan oo leylisan. Ka eeg bogga 6-aad macluumaad badan.

**Daabac Kaarka Warbixinta?**

*Haddii aad leedahay arday badan, waa inaad ka doorataa arday dhinaca midigta ee sare si aad u aragto macluumaadkooda.*

Dooro qeybta **Dukumeentiyo** oo dooro sannad dugsiyeedka aad rabto inaad kaar ka daabacato. Ka eeg bogga 6-aad macluumaad badan.

## Eeg macluumaadka xaadiritaanka?

*Haddii aad leedahay arday badan, waa inaad ka dooratаа arday dhinaca sare si aad u aragto macluumaadkooda.*

Dooro qeybta **Xaadiritaanka**  Dhammaan maqanayaasha iyo kuwa soo daaha muddada hadda jirta ayaa soo muuqan doona. Guji koorsada si aad u aragto faahfaahin dheeraad ah mise u adeegso fallaaraha xagga sare si aad u dhex marto sannad dugsiyeedyada. Ka eeg bogga 7-aad faahfaahin badan.

## Eeg khidmadeyda oo samee lacag bixin?

*Haddii aad leedahay arday badan, waxaad wada arki kartaa dhammaan khidmadooda, mise waxaad dooran kartaa arday si aad u aragto khidmadaha gaarka ah.*

Dooro qeybta **Khidmad** si aad u aragto khidmadaha la qiimeeyay. Fadlan ogow in dhammaan khidmadaha lagu wada dhiibin karin qaab olneen ah. Khidmadaha waxaad ku bixin kartaa si dhammeystiran ama inyar inyar. Si aad u bixiso khidmad, guji **Gali Dambiisha** kadib guji **Dambiisheyda** si aad dib ugu eegto habraaca lacag bixintaada. Ka eeg bogga 8-aad macluumaad badan.

## Cusbooneysii macluumaadka xiriirkeyga?

Cusbooneysiinta waxaa lagu sameyn karaa qeybta  **Wax badan**  hoostimaada. Fadlan ogow inaadan awoodin inaad wax ka beddesho macluumaadka inta lagu jiro daaqadda Xaqiijinta iyo Deganaanshaha onlaynka ah (sida caadiga ah Abriil-Julaay) maadaama wixii cusbooneysiin ah lagu daro codsiga xaqiijinta. Isbadallada waa in dib loo eegaa oo ay ansixiyaan shaqaalaha xafiiska iskuulka ka hor inta aysan ka soo muuqan Campus Parent.

**Si aad u cusboonaysiiso lambarka qoyska**, dooro **Address Information.** Waxaad arki doontaa lambarka telefoonka koowaad ee hadda iyo ciwaanka dhammaan xubnaha qoyskaaga. Guji Cusbooneysii si aad u codsato baddalka lambarka telefoonka. Ciwaanka laguma dhex badali karo shabakada.

**Si aad u cusboonaysiiso macluumaadka xidhiidhka qoyska**,  **Family Information**. Guji Cusbooneysii magac kasta hoostiisa si aad u codsato cusboonaysiinta lambarka telefoonka shakhsiga ama cinwaanka iimeylka.

**Si aad u cusboonaysiiso macluumaadka xidhiidhka degdega ah**,, dooro **Demographics** oo dooro arday dhanka midigta sare ku jira (haddii aad leedahay wax badan). Waad cusbooneysiin kartaa, ku dari kartaa, mise ka saari kartaa xiriirada dagdagga ah.

## Eeg leylisyada hadda ee ardageyga?

*Haddii aad leedahay arday badan, waa inaad ka doorataa arday dhinaca midigta ee sare si aad u aragto leylisyadooda.*

Guji **Leylisyo** si aad u aragto leylisyada soo socda ee dhammaan fasallada. Fadlan ogow kuwani waa kuwo loo qabanqaabiyay laga soo bilaabo kii hore ilaa kii ugu dambeeyay, iyada oo leylisyadii ugu dambeeyay ay ka hooseeyaan. Leylisyada waqtigooda dhaafay waxay ku soo baxayaan doonaan casaan - waxaad gujin kartaa**Maqan** si aad u aragto dhammaan leylisyada waqtigooda dhaafay.

## Badal furaheyga sirta Parent Portal?

Guji  Liiska isticmaalaha ee dhinaca midigta sare oo dooro **Akoon Sitin-ka**. **Furaha sirta**hoosteeda, cguji **Cusbooneysii.** Waa inaad gelisaa furaha sirta ee xooggan, haddii kale khadka ma aqbali doono. Dul wareeji calaamada sanduuqa xoogga furaha sirta si aad u aragto shuruudaha furaha sirta.




## Eeg/Cusbooneysii Ammaanka Akoonka Iimeylkeyga?

Ammaanka Akoonkaaga Iimeylka waa iimaylka la isticmaalo haddii aad illowdo magacaaga isticmaalaha mise furaha sirta ah. Waxa la dejiyay marka aad samaysato akoonkaaga markii ugu horaysay waxana laga yaabaa inay ka duwanaato iimaylka xidhiidhkaaga. Guji  Liiska isticmaalaha ee dhinaca midigta sare oo dooro **Sitin-ka Akoonka Iimeylka Amniga Akoonka** hoosteeda, waxaad arki kartaa amaanka iimeylka hadda. Guji **Cusbooneysii** haddii aad jeclaan laheyd inaad badasho.



# Darajada

Dooro **Darajooyinka** oo dooro arday (haddii ay khusayso) si aad u aragto darajooyinkooda. **Darajooyinka dugsiga hoose lagama heli karo bogga internetka**, laakiin waxaad daabacan kartaa kaarka warbixinta hoose ee aagga **Dukumeentiyo**

Waxaad ku arki doontaa dhammaan fasallada jadwalka ardaga ee teeramka. Sannad dugsiyeedka iskuul sare waxa loo qaybiyaa laba Simistar (S1, S2), dugsiga dhexena waxa loo qaybiyaa 4 teeramadood (Q1, Q2, Q3, Q4). Waxaad rogi kartaa teeramka teermakiisa adoo isticmaalaya fallaaraha sare.




### Eeg Dhibcaha Leyslisyada

Haddii macluumaadka leyliska ee koorsada la heli karo, waxaa jiri doona falaar midabka dambaska leh oo khafiif ah oo ku xigta darajada. Guji halkan si aad u aragto qeybaha leylisyada.

Leylisyada waxaa loo qeybiyay qaybo bare ku qeexan, waxaadna arki kartaa wadarta guud ee darajada la kasbaday qayb kasta. **Guji aaykonka calaamada kudarta si aad u aragto leylisyada iyo dhibcaha shakhsiyadeed.**




### Miisaanka

Barayaasha waxay u kala saari karaan leylisyadooda qaybo waxayna siin karaan qaybahaas miisaanyo kala duwan.

Haddii qayb miisaankeedu ka sarreeyo mid kale, dhibcaha leylisyada ee qaybta sare waxay u xisaabin doontaa wax ka badan xisaabinta dhammaan fasallada.

## Leylisyada Maqan (Dugsi sare kaliya)

Si aad u hesho leylisyada maqan, guji **Leylisyo**

Halkan waxaa ku taxan dhammaan leylisyada fasallada taariikh ahaan, oo ay ku jiraan leylisyadii hore iyo kuwa mustaqbalka.

1. Guji **'Maqan'** oo ka rog qeybta sare ee shaandheynta leylisyada ka maqan liiska oo kaliya.
2. Guji **'Teeramka Socda'** oo ka rog qeybta sare ee shaandheynta leylisyada Sannad dugsiyeedka hore mise mustaqbalka .




## Kaararka Warbixinta

Si aad u daabacdo kaar warbixin, dooro qeybta **Dukumeentiyo** . Waxaa laga yaabaa inaad aragto dhowr ikhtiyaar oo sannad dugsiyeedyo kala duwan, balse iyada oo aan loo eegin sheyga aad doorato, **had iyo jeer waxay daabacan doontaa kaadhka warbixinta xilliyadii ugu dambeeyay.**

Mar haddii aad sameyso xulasho, kaarka warbixintu wuxuu soo saari doonaa dukumeenti .pdf ah. Waxa laga yaabaa inay ka soo baxdo baraawsarkaaga ama ay ku soo dejiso aaladaada, iyadoo ay ku xirantahay goobaha baraawsarkaaga.

Dukumeentigan waxaad ku keydin kartaa aaladaada mise si toos ah ayaad u daabacan kartaa.



# Xaadiritaanka

Xaadiritaaka gudaha shabakada waxa la cusboonaysiiyaa wakhtiga dhabta ah iyadoo lagu salaynayo imaanshaha macallimiinta. Hasayeeshee, xaadiritaanka looma tixgalinayo in la dhamaystiray ilaa lala dhaqangaliyo xoghayaha xaadirinta. Tani waxay la macno tahay haddii ardagu soo daaho ka dib markuu barahu xaadiriyo inay maqan yihiin, shabakaduna waxa suurtagal ah inay usoo bandhigto maqnaanshahooda ilaa xoghayaha xaadirinta uu dhaqangaliyo imaanshaha dhammaadka maalinta.

Dooro qeybta **Xaadiritaan** tiro dhan dhammaan maqanayaasha iyo daahitaanka ardaga ee sannad dugsiyeedka. Waxaad arki kartaa sannad dugsiyeedkii tagay adoo isticmaalaya fallaaraha sare. Guji falaarta midabka dambaska ah leh ee fasalka si aad u aragto faahfaahinta dhacdooyinka xaadiritaanka ee liiska ku jira.




Waxaad kaloo ka eegi kartaa xaadiritaanka qeybta **Kalandar** . Guji batanka **Xaadiritaan** ee ku yaal xagga sare ee jadwalka, iyo dhammaan maalmaha bisha la doortay oo ay weheliso dhacdo xaadirin ardagu waxay muujin doontaa dhibic madow. Dooro maalin si aad u aragto macluumaadka xaadiritaanka.



# Bixinta Khidmada

Ardada dagmada iyo waalidiinta hadda waxay ku bixin karaan qaar ka mid ah khidmadaha khadka tooska ah ee Infinite Campus Parent Portal iyagoo wata jeegaga elektarooniga sie Visa, Mastercard, mise Kaararka Discover.

Dooro qeybta **Khidmad** si aad u aragto khidmadaha lagu leeyahay. Si aad u bixiso khidmadaha, guji **Gali Dambiisha**oo ku xigta khidmada(yada) aad rabto inaad bixiso, dabadeed guji **Dambiisheyda** Si aad u aragto khidmadaha hal arday, ka dooro **Qof**hoos usoo dhacaha.







**Dambiisheyda**

Dambiishaady waxey soo badhigi doontaa dhammaan khidmada aad doorotay.

Si aad u sameyso lacag bixin qeyb ah:

Guji sanduuqa **Qadarka**ee ku xiga khidmada oo geli qadarka aad rabto inaad ku bixiso kharashkaas. Waxaad samayn kartaa lacag-bixinno ugu hooseeya sida $5, laakiin khidmadaha waa in si buuxda loo bixiyaa taariikhda la filayo

Qaababka lacag bixinta:

Haddii aysan jirin **Qaabka Lacag bixinta** ee taxan, mise haddii aad rabto in la baddalo habka liiska ku qoran, waa inaad gujisaa **Kudar Qaab Lacag bixin** oo geli faahfaahinta lacag bixinta.

Gudbi Lacag bixinta:

Si aad u bixiso wadarta lacagta habka lacag bixinta ee liiska ku qoran,**Dir Lacag bixinta.**

## Qaababka lacag bixinta:

Nidaam kasta oo lacag bixineed oo hadda ah oo aad hore u soo gashay ayaa halkan ka muuqan doona. Si aad dib ugu eegto ama aad wax uga beddesho faahfaahinta habka lacag bixinta, dhagsii falaarta cawlan ee ku xigta.

Si aad u galisid qaab cusub oo lacag bixin ah, **Cusub**




Dooro Hubinta, Keydimaha, mise Kaarka Credit/Debit, ka dibna geli faahfaahinta koontadaada mise lambarka kaarka.

**Naaneys** waa kuu adiga oo keliya si aad u kala saari karto qaababka kala duwan ee lacag bixintaada.

**Koontada hubinta/keydinta, looma baahna in qof ahaan loo buuxiyo jeeg. Geli lambarada muuqda iyo cadadka la tilmaamay waxaa laga saari doonaa akoontada.**




Haddi aad rabto in habkani uu noqdo mid ku haboon lacag bixinta mustaqbalka, saar calaamada sax **Isticmaal Sanduuqa Asalka.** Had iyo jeer waxaad haysataa ikhtiyaarka ah inaad badasho qaababka  lacag bixinta ka hor inta aanad lacag-bixinta ku soo gudbin **Dambiisheyda**.

Guji **Keydi** si aad u keydiso qaabka lacag bixinta. Waxaad ku dari kartaa nidaam kale oo lacag bixineed ah haddii aad rabto, ama dib ugu dhufo si aad ugu soo noqoto shaashadaadii hore.



**Lacag bixinta Ikhtiyaariga**

Dugsiyada qaar ayaa siiyaan waalidiinta ikhtiyaarka ah inay bixin karaan khidmada ikhtiyaariga ah qaarkood (sida kaadhka dhaqdhaqaaqa, buugaagta sannadka, iwm) iyada oo loo sii marayo Waalidka dhismaha jaamacada.

Si aad u aragto khidmadaha ikhtiyaariga ah ee la heli karo, dooro qeybta **Khidmad** oo guji batanka **Lacag bixinta Ikhtiyaariga** ee u dhow xagga hoose ee shaashadda.




Kharash kasta oo ikhtiyaari ah oo la heli karo ayaa usoo bixi doona ardayda la doortay Guji**Gali Dambiisheyda** wax kasta oo khidmad ah oo aad rabto, kadib guji **Dambiisheyda** si aad lacag u bixiso mise **Noqo** si aad ugu soo noqoto shaashadii hore.




Haddii aad su'aalo ka qabto mid kasta oo laguu qoondeeyay ama kharashyo ikhtiyaari ah, fadlan la xiriir iskuulka ardaygaaga. Haddii dhibaato farsamo ay kaa haysato nidaamka lacag-bixinta onlaynka ah, waxaad kala xidhiidhi kartaa miiska caawinta 816-359-5000.